


- Hubi in qadarta lacagta kugu qoran akoonkaaga ay sax tahayyo in ay warqada lacag bixinta ay leedahay nambor ansiixinta oogolanshaha.
- Khasnajiga wuxuu kusiinaya nuqulka warqadal acag bixinta.
- Meel dhiigo nuqulka warqada lacag bixinta si aad u xasuusato.

**OGOW:** Dukaamada qaar oo aan lahayn mashiinada EBT, sida suuqyada beeralayda, waxaa laga yaaba in ay isticmaalan waraqadaha lacag bixinta.

## Maxaa dhacaya hadduu Kaadhkaaga Jihada Ohio uusan shaqayn karin?

Waxaa jiraa sabaabaha qaar oo uusan kaadhkaaga shaqaynayn:

- Diilinta xooga bir-labeedka ayaa laga yaaba inuu cilaadaysan yahay.
- Waxaa afar jeer si khalidan u gilisay PIN-kaaga, kaadhkaagana wuu "xiranyahay".
- Waxaad Isku dayday in aad isticmaasho in kabadan wixii kujira Kaadhkaaga Jihada Ohio.
- Hadduusan kaadhkaaga shaqaynayn, wac Adeega Macaamiisha ee **1-866-386-3071**.



## Adeega Macaamiisha

### Goormaan isticmaala Adeega Macamiisha?

- Si degdeg ah wac Adeega Macaamiisha hadduu Kaadhkaaga Jihada Ohio lumay, la xaday ama hallaabay. Adeega Macaamiisha wuxuu xiraya kaadhka aad hadda isticmaalayso waxaana heeli karta kaadh cusub 7 malmood gudahooda.
- Waxaad ogaan karta haraaga xisaabtaada adigo firiraya rasiidkaaga ugu dambaysa, wicidda Adeega Macaamiisha ee **1-866-386-3071** ama booqanaya **ConnectEBT.com**.
- Adeega Macaamiisha waxay sido kale ku siin karta toka iibsiga ugu dambaysa.
- Haddii aad iloowday PIN-kaaga, wac Adeega Macaamiisha ee **1-866-386-3071** ama booqo **ConnectEBT.com** oo raac tilmaamaha doorashada PIN-ka.

- Wac Adeega Macaamiisha si aad u codsato isku hagaajinta akoonkaaga si aad u saxdid khalad kasta oo imaan karaa.
- Marwalba aad qabtid su'aalaha ama caawimaad karaabta kaadhkaaga, wac Adeega Macaamiisha.

Adeega Macamisha waxaa la heeli karaa 24 saacadood, toddoba maalmood toddobaadkii.

## Ammaanka

### Sideen u ilaalashada Kaadhkaaga Jihada Ohio?

- **HA DHIGIN** kaadhkaaga meel kulayl ah ama wax kasta oo xoog bir-labeed ah, sida TV-yada, makiinada cuntada kululaysa ama qalab kale elektaroonig ah.
- **HA DHIGIN** qallociniin kaadhkaaga.
- **HA DHIGIN** uu ogoolaanin in diliinta bir-labeedka qaybta dambe kaadhka u xoqmo ama hallaabo. Kaadhkaaga ma shaqayn doono haddii ay tani dhacdo.

### Sideen u ilaalashada PIN-kayga?

- **MARNABA** ha usheegin qof kale PIN-kaaga sirta ah.
- **HAKU** qorin PIN-kaaga kaadhkaaga dushiisa.
- **HAKU** qorin PIN-kaaga wax kasta aad qaadato sabaabto ah hadduu lumo borsadaada ama la xado, waxay gudaha u gali karan akoonkaaga.

### Sideen u ilaalashada dheefahayga SNAP?

- Hadduu kaadhkaaga lumo ama la xado, wac Adeega Macaamiisha si deg deg ah. Marki aad qaybta PIN-ka la gashto gilnayso PIN-kaaga, hubi in uusan qof kale arkayn nambarka aad gilnayso. Hadduu qof kale ogaado PIN-kaaga oo isticmaalo dheefahaaga, dheefahaaga lama bedeli doono.
- Haddii aad umalaynaysa inuu qof kale ogyahay PIN-kaaga, wac Adeega Macaamiisha si aad u doorato PIN cusub.

### XAQ AAD U LEEDAHAY HAB-DHAQAN SIMAAN

USDA waa loo shaqeeyaha iyo bixiyaha fursadaha siman.

Gadashada, libinta, amahaddii kale isticmaalka dheefaha SNAP qaab khalidan waa dambi federaal ah. Si aad uga warbixiso xad-gudub looga shakisanyahay, booqo [www.usda.gov/oig/hotline.htm](http://www.usda.gov/oig/hotline.htm) ama wac 1-800-424-9121.

# Ohio

## Direction Card

## Xawaalada Dheefaha Elektaroonig ee Ohio (EBT)



**Hab ammaan ah oo si sahlan loogu adeegsan dheefaha SNAP, sidoo kale loo yaqaano gargaar cunto.**



**Adeega Macaamiisha:  
1-866-386-3071**

Wac 24 Saacadood Maalinti / 7  
Maalmood Toddobaadkii ama booqo  
**ConnectEBT.com**



# Kuso dhowoow Barnamijka SNAP ee Ohio!

## Qaabkee u heeli kartadheefahaaga SNAP?

Dheefahaaga SNAP waxaad ka heeli doonta Kaadhka Jihada ee Ohio. Kaadhkaaga Jihada Ohio waa kaadh iibsiga. Tani waxaa loola jeeda ma isticmaali kartid dheefaha dheeraad oo aadan u qalmi karin in aad heesho. Dheefahaaga SNAP waxaa lagu shuba akoonkaaga Xawaalada Dheefaha Elektaroonig (EBT) bil walba oo aad u qalantid. Dheefahaaga waxaad heli karta dhammaan dukaamada raashinka adigo isticmaalaya Kaadhkaaga Jihada ee Ohio iyo PIN-kaaga sirta ah ee 4 nambarka kooban.

Intaadan isticmaalin Kaadhkaaga Jihada ee Ohio, fadlan si digtoon u akhri buugaan. Macluumaadka waxaa loogu talagalay inuu kajawaabo su'aal walba aad qabtid ku sabsaan Kaadhkaaga Jihada ee Ohio.

## Heelida Dheefaha

### Sideen u heela dheefahayga?

Dheefahaaga si toos ah ayaa lagu shuba akoonkaaga Kaadhka Jihada ee Ohio isla maalinta bil kasta. Waa inaad la hubisa waaxda adeega qoyska iyo shaqada ee degmadaada si aad u ogaato maalinti aad heli doonto dheefahaaga.

Maalinti aad heli lahayd dheefahaaga haddii ay noqoto fasax asbuuc ama fasax caadiga ah, waxaad dheefahaaga heeli karta isla maalintaas.

Majiro tirada doolaarka ka yar ee iibsi walba ee SNAP ma jiro tirada xaddidan iibsiga ee SNAP oo aad samayn karta, inti ay lacag kugu jirto akoonkaaga.

Isticmaal halkii kaadh bil kasta. **HA tuurin kaadhkaaga.** Waxaa keli isticmaali karta tirada dheefaha aad u qalantid in aad heesho. Haddii aad isku daysid in aad isticmaasho in kabadan inti kugu jira akoonkaaga, iibsigaas lama aqbaali doono. Haddii ay sidaan dhacdo, waxaad soo ceelin kartaa alaabta qaar ama aad qaab kale ku iibsatid inti dheeraadku ah. Haddii aadan isticmaalin dheefahaaga SNAP bil gudaheeda, akoonkaaga ayay kugu jirayan waxaana isticmaali karta bisha soosocota. Dheefaha aan 365 malmood gudahooda la isticmaalin akoonkaaga ayaa laga saari doona mana la bedeli karo.

## Kaadhka Jihada ee Ohio

### Sideen ku iibsan karaa Kaadhkaaga Jihada ee Ohio?

Kaadhkaaga Jihada Ohio waxaad ku isticmaali karta dhammaan dukaamada raashinka oo leh calamaada Kaadhka Jihada Ohio, hoos ku xusan.




Haddii aad gobol kale wax ka iibsatid, raadi astaanta Quest®.

Dukaamada raashinka kuyaala Ohio badankooda way ogooyihiin Kaadhka Jihada Ohio. Haddii aadan hubin, la hubi dukaanlaha ama adeega qancinta macaamiisha.

**OGOW:** Dhammaan dukaamada hal qalab EBT ma isticmaalan. Shaashada karaac tilmaamaha khasnajiga.

- Adiga ama khasnajiga wuxuu marinaya Kaadhkaaga Jihada Ohio mashiinka Goobta libsigaa (POS). Marki ay kaadhkaaga mashiinka POS la mariyay, EBT ka dooro shaashada POS si aad u wadid.
- Kadib qaybta mashiinka PIN-ka waa in aad gelisa Nambarkaaga Aqoonsiga Shakhsiyadeed oo ka kooban 4 nambarka oo sir ah. **Marnaba nambarkaaga sirta PIN-ka ha u sheegin khasnajiga ama qof kale. Marnaba ha u sheegin khasnajiga inuu ku giliyo PIN-kaaga.** Haddii aad iloowday PIN-kaaga, wax **1-866-386-3071** si aad u doorato PIN cusub.
- Mashiinka wuxuu daabaacaya rasiidka ku qoran taariikhda, magaca ganacsatada iyo goobta, nooca iibsiga, qadarta lacagta iibsiga, iyo haraaga kujirta akoonka.




- Xasuusnow in aad qaadatid kaadhkaaga iyo rasiidkaaga marki aad tagaysa.
- Meel dhigo rasiidkaaga si aad u ogaato haraagaaga mar kale aad wax iibsanayso.

## Waa maxay PIN?

- PIN waxaa loola jeeda Nambarka Aqoonsiga Shakhsiyadeed.
- Waa in aad haysato 4 nambarka PIN-ka si aad u isticmaasho Kaadhka Jihada Ohio.
- Si aad u doorato PIN-ka, wax Adeega Macaamiisha ee **1-866-386-3071** ama booqo **ConnectEBT.com**. Waxaa u baahnaan doonta:
  - Nambarka Kaadhkaaga
  - Nambarkaaga Caawimaada Lacagta
  - Taariikhda Dhalashada
- Marwalba dooro PIN kugu sahlan si aad u xasuusato lakiin ku adag qof kale inuu ogaado haddii ay heelan kaadhkaaga.
- Ha isticmaalin nambarda kujira cinwaankaaga ama nambarkaaga teleefoon. Hadduu kaadhkaaga lumo ama la xado, Nambarda waa u sahlanan karaa inuu qof ogaado.
- Xafid PIN-kaaga. Haku qorin PIN-kaaga wax kasta aad qaadanayso.
- Haddii aad iloowdid PIN-kaaga, wax Adeega Macaamiisha ee **1-866-386-3071** ama booqo **ConnectEBT.com** si aad u doorato PIN cusub intaadan dukaanka u bixin.
- Haddii aad PIN khaldan gilid marki aad joogto dukaanka, mashiinka ma aqbalayo iibsiga. Afar jeer marki aad PIN khaldan gilid, kaadhkaaga, ma shaqayn doono kaadhkaaga ilaa maalinta xigta. Ogow: PIN-ka wuxuu dib isku saxaya si toos ah saqda dhexe marki u iibsiga fulin diido. Wac Adeega Macaamiisha ama booqo **ConnectEBT.com** si aad u doorato PIN cusub.

## Maxaa dhacaya haddi mashiinka EBT taala dukaanka uusan si fican u shaqaynaynin?

Haddii mashiinka EBT taala dukaanka uusan sifiican u shaqaynayn, wali waxaad isticmaali karta kaadhkaaga.



Khasnajiga wuxuu isticmaali karaa warqad lacag bixinta wuxuuna wici karaa nambarka Adeega Macaamiisha Tafaariiqle si uu heelo ogoolansha qadka ee iibsigaaga. Marka xiga:

- Khasnajiga wuxuu buuxinaya warqada lacag bixinta. Khasnajiga wuxuu kaga baahnanaya macluumaad, sida magacaaga iyo nambarka kaadhkaaga.
- Marki uu khasnajiga dhammaystiro buuxinta warqada lacag bixinta oo uu heelay ogoolanshaha, waa in aad saxiixda foomka lacag bixinta.